# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

*Minuteska*

**Dooda Xeerka Isgaadhsiinta Qaranka**

**Kal- fadhigii 14aad　　Fadhigiisii 31aad　　04/04/2011**

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 31Mudane , waxayna Socotay4 maalmood, wuxuu bilaabmay 04/04/2011 wuxuuna dhamaaday 07/04/2011kii***

1. **Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde (Xisbiga UDUB):-** Waxaynu ognahay isgaadhsiinta Somaliland sida ay ku bilaabatay waxay ku bilaabatay si jaantaa rogan ah oo liisamada iyo hishiisyada midba meel gooniya laga helay iyadoo markaa sabab utahay farsamo la'aan, isgaadhsiintu waxay bilaabatay 1992, waxayna ku bilaabatay Fooniyaal, kolay liisanbay haysteen cidnbaa siisay sanadkii 1993, waxaa soo galay STC iyo Shirkada kale ee SOLTECO, iyana liisano ayaa lasiiyay waxaa laga yaabaa liisanada la siiyay Fooniyhah, STC iyo SOLTECO inaanay Iskumid ahayn (identical), oo wax systematic oo format inta la sameeyay meesha yaala aanay jirin oo file laga soo sarayo, mid walba waxay ku qaadanjireen Negotiation ay xiligaa wada galeen masuuliyiintii markaa xilka haysay iyo shirkadihii.

   Waxaa ku xigtay 1996kii oo SETCO ah, waxaa kaloo ku xigtay 1999kii shirkadii Barakaat oo hada ah TELESOM, waxaan uga danleeyah in aanay jirin license standard ah ama Heshiis standard oo samaysnaa aanu jirin oo markaa lagu dabaqay, ee masuuliyiintii markaa joogtay iyo halkii la isku afgartay ay ka fursanwayday uun uu ahaa, Xeerka waxaa ku yaal in siguud dawladihii waxay bixiyeen ama heshiiyadii ay la galeen shirkado waxaa loo aqoonsanayaa sidoodii, anigu taa waxaan u arkaa khalad, maadaama aanu heshiis standard ah aanu jirin, shirkadihii wakhtigaa joogay ee isku wada serviceka ahaa mid walba heshiis iyo license gaara oo wakhtigaa joogay lala galay.

   Xeerkani waxaa uu fasaxayaa in heshiiyadaa iyo lisamadaa dib loogu wada noqodo, oo shuruudaha xeerkan la waafajiyo, kii aan waafaqsanayn dib negotiation looga galo. Waxaa loo cuskankaraa qodob dastuuri oo ***Qodobka 10aad*** ee ka hadlaya xidhiidhka dibada, wuxuu leeyahay "**Jamhuuriyada Somaliland waxay dhawraysaa Heshiiyadii dawladihii hore lagashay shirkado ama dawlado shisheeye hadii aanu ka hor imanayn danta iyo maslaxada Somaliland"** ujeedaduna waa taa, markaa heshiiyadan iyo liisamadan waa in dib loogu noqdo iyadoo la adeegsanayo danta umada iyo maslaxada cida ka masuulka ahi waxa weeyaan kolba xukuumada markaa joogta.

   Xeerkani laba wax buu huwanyahay, duruufbaana keentay oo shirkadahaa ka horeeyay, shirkada hawlahood iyo lisamdooda waxay ka horeeyeen xeerka oo wax loola kacay maaha, waa laba arrimood xeerku oo ah, ka daba tag uu ka daba tagayo wixii dhismay iyo Qodobkii aynu qaadanay ee ahaa dhaqaalaha xorta ah, iyadoo la furfurayo oo la liberalism garaynayo

Telecomunicationkii, Xeerarka dalka iminka loo samaynayo waa sidaa, oo waa liberalization oo dawladaha dariska ah ayaa samaystayn oo waxaynu hindisayno oo cusub maaha.

***Liberalisationkaa waxaa looga jeedaa saddex Role in lakala qaado, oo aanu gacanteena ku ururin.***

1. Policy making, Cidii siyaasada iyo strategy isgaadhsiinta dhigaysay waa inay cid gaara oo tilmaaman ahaato.
2. Regulatory body, cidii regulationka lahayd waa inuu tilmaan gaara yeesho.
3. Operation, cidii fulinaysay ee operationka lahaydna waa shirkadihii oo inay is dhexgalaan maaaha.

Saddexdaasu inay is dhexgalaan maaha, oo haayadao carifan oo xuduud kala leh inay hawshaa qabtaan, hadii taa la waayo, waxaa dhacaysa Raashiya oo kale, si aanay taasi inoogu dhicin waa saddexdaa waaxood lakala qaadaa, oo aan la isku darin, Komishankaa cida noqonaysaa waa Regulatory, waana inaanay dawladu ku jirin, xukuumadu waxay leedahay policyga, labadii isma dhex fadhiyi karaan waa (Conflict of Interest) shirkaduhu ma dhex fadhiyi karaan dawlada, oo shirkadii la regulategaraynayay ma dhex fadhiyi karaan regulatory bodyga, oo cid soo dirso lama odhan karo.

Waxaa kaloo xeerka looga danleeyahay waa hanti ururin, laba arrimood baan halkan ku hayaa, labaa mid waxaa qoray nin layidhaahdo Eng. Axmed Cali Ubaxle, tiro koob yar oo kooban buu keenay, Mobile GSM dadka isticmaalaa wuxuu ku qiyaasay 278,000 GSM Mobilada ah, Linelandskana wuxuu ku qiyaasay 51,400, Internet userkana wuxuu ku qiyaasay ilaa 5000, halkaa waxaad ka garan karataa cashuurta intaa le'eg ee ka soo bixikarta, Midina waa Document ay soo saartay Wasaarada Maaliyadu oo la socotay Miisaanayada ( three year fiscal strategy for the Goverment)  oo ka hadlaysa waxaa la yidhaahdo  cashuuraha baaqday.

Hadaan ku horeeyo, inta injineerku qoray, wuxuu example u soo qaadanayaa Bariga Africa, shirkada marka ruqsada la siinayo, waxay isticmaalaysaa Electro magnetic oo frequency radiationka ah waa hanta Qaran, shirkada marka hore ruqdsad baa laga qaadaa, marka laga qaado ee marka kaliya ah mawjadaa laga kireeyaa, mawjadahaana sanadkiiba lacag baa laga qaadaa, sida mawjaduhu u kala dheeryihiin ama u kala gaaban yihiin, shirkada buu soo qaatay ZIAN la yidhaahdo, ruqsada moblika marka la siinayay kiradii ugu horeysay waxaa laga qaaday $60,000,000, Mawjadaha 900mhz uu ku qiyaasayna oo u dhiganta 120 mawjadood, mawjadiiba $7000, oo isku noqonaysa $840,000,000 isugayntii sanadkiiba. Sidoo kale mawjadaha ee ka dhaadheer ee 1200mhz ah, oo iyaguna ah 320 mawjadood, mawjadiiba waxaa laga qaadaa sanadkiiba $5000, taas oo isugayn sanadkiiba noqonaysa $1,600,000.

Waxaan taa ku kabayaa estimate  ka ay samaysay canshuuraha baaqda ee Wasaaradda Maliyaddu mala awaal ayeey soo qaadatay waxay tidhi shirkad leh 500.000 (mobile subscriber ) in kastoo aynu halkaa aynu gaadhin, shirkada ugu badan ay leedahay 250.000 Subscriber oo Hypothetical bay u soo qaateen halkaasaa laga xisaabin karaa 250,000 intay noqon karto. 500,000 ee subscriber waxay u qiyaaseen in maalintiiba qofku isticmaalo $1 oo Prepaid card ah, saleskii maalintaa samaysmay waxay ka dhigtay 5,000,000 milyan per annual bay soo saartay oo waxay ka dhigtay $182, 000,000, maaha wax fact ah sidaa u fahma insha'alaaha waynu gaadhiye. salesTaxeka markaa ku waajibayaa  oo 5% ah, waxaa kaloo ku waajibaya Profit Taxes oo isagana la xisaabin karo.

Shirkada intaas le'eg lacagta ka soo baxaysa wuxuu ku qiyaasay $22,000,000 sanadkiiba, waxaan ku jirin oo shirkahaasi iibisaa korontadii, iyana cashuur baa ku waajibaysa, internet servicekii ay qabanayeen oo lagu qiyaasay ilaa 5000 user inay jiraan cashuur baa ku waajibaysa, Incoming calleska iyo landline servicekiisa, xeerka markaa waxaanu u samaynay u jeedadiisu Hantidaa baaqatay inuu doono, oo dariiqii loo marayay sharciyeeyo iyo liberalization.

Xeerkan af Ingriisi baa laga soo turjumay oo Confusion baa jiraya, Confusionkaasi waxaa weeye afgriis baa laga soo turjumaye, waxaa haboonayd in si aan Termenology la isugu khilaafin inaynu hayno source marka hore, oo sourcekii xeerku ka yimi ee af ingriisiga ahaa, oo markaa si u wada fahano kalmadaha Xeerka, oo qofba si gaara loogu soo macnayn, horta waxaan codsanaynaa in sourckii la keeno si aan u qiimayno oo isugu afgarano inaga laftigeenu oo isu fahamno.

Tan kale arrangement xeerka waxaan ka odhanayaa, waxa weeye komishanka waan ka hadloo waa inaanu noqon komishan aanay ka dhex muuqan xukuumadii iyo shirkadihii **Md. Rayte:-** Golahuna ansixiyo**, C. Jirde** of course Goluhuna ansixyo, markaanu isu eegay (fahraska) contentska iyo Telecomunication act oo 2000 soo baxay oo Uganda ah, wax badan bay iska shabahaan, laakiinse waxyaabaha ka maqan ee aan doonayo inaan (carifo) cadeeyo waxaa weeye, laba arrimood oo waaweyn, midn waxa weeye Telecommunication ku dhul buu isticmaalaa, ama mash ha noqoto ama dish ama line ah noqotee, dhul buu marayaa, dhulkaasina wuxuu leeyahay (very completed property rights) oo mid private ah iyo mid Community ha noqoto, markaa waa inay xeerka ku qeexantahay sida dhulkaa loo isticmaalayo iyo cida awoodeeda yeelanaysa iyo sida dadka meesha degan loogu khasbayo inay ama ka wareegaan ama ka guuraan ama u hibeeyaan, waayo, specific use buu leeyahay telecommunication ku.

Waxaa kaloo ka maqan, enforcement, investigation iyo inspection, sida xeerka loo enforcementgaraynayo, cida soo investigationgaraynsa iyo inspectionkii, intaa waxaa ka dhalan kara ciqaab (offense), Xeerkana kuma qeexna ciqaabta ka dhalanaysa iyo fulin la'aanta Xeerka Qodobadiisa, waana inay ka muuqata ciqaabtu waxay tahay. Xeerka inta badan laga soo dheegtayna way ku jirtaa.

Waxa kale oo aan xusayaa, naqdi badan xeerkan ah galimaayo oo waa xeer dheer, intaa ka maqan uun, ee komishankaa siduu u qoranyahay dib loogu noqdo, oo saddexda awoodood ee Policy making, Regulation body iyo Operations aanu isku milmin, oo Ha'yad kulmisa aanay jirin, ee qolo waliba halkeeda awoodeeda iyo xuquuqdeeda ku leedahay. Waxaan kaloo ku darayaa Gudidu waxay ku soo dartey lisamadii hore, **Qodob Faqrada 3^aad^** bay ku kordhiyeen faqrad ee Cableka anigu waxba ka odhan maayo, laakiinse waxaan leeyahay ha la (qualify) oo heshiiskaasi wuxuu sharci (Valid) ku noqonayaa marka loo aqoonsado in danta iyo maslaxada Jamhuuriyada Somaliland ka jawaabayo, ee yaan la iska ogolaan, siduu yahay maanta hadii xeerka lagu passgareeyo, dawladu lisamadii dib ugu ma noqon karto, oo meel ka gasho lisamada waxaasi lacag ahi ku maqantahay heshiisna kala gasho lana regulate garayso shirkadihii ma hayso hadaynu xeerkaa Gudbino.

Kuwan danbe ee iminka la galayna, sida Wasiirka Xanaanada xoolaha markuu ka hadlayay arrinta maxjarka muu daadafayn ee wuxuu yidhi, waxaan ka negotiategaraynaynaa wixii maslaxada iyo danta dalku ku jirto ee aan xeerka ku jirin, xaqnaana u leenahay inaan kala xaajoono oo dib u eegno xeerka, waana Government policy dawladu ku dhaqaaqday oo ninkii maxjarka la siiyay laga daba tagay oo la soo fariisiyay oo la yidhi waxaa ku jira qodobo

maslaxada iyo dantayada ka horimanayee, maslaxada iyo danta dawlada fasiraysa, laakiin waxaan idiinka digayaa oo ay gaadhsiisan tahay Isgaadhsiinta soo socoda, waxaynu ka hadlaynaa shirkado maxaliya, maanta ma kalalaha Maxali iyo shisheeeye oo lacagtu xuduud ma kala laha, waxaynu doonaynaa in wixii danbe sidaa looga negotiategareeyo. Wasaala Calaykum.

2. **Md. C/raxmaan Cismaan Caalin (xisbiga UCID):-** Xeerkan aynu maanta u fadhino falanqayntiisa inuu golaha kasoo baxo xeer dhamaystiran oo lagu maamulo isgaadhsiinta dalka ee boqolka sanadood ee soo socda, waxaa la yidhaahdaa xeerka markaad samaynayso, hadii aad adigoo qof niyada ku haya samee wuu kaa leexanayaa, markaa waxaa waajib ina saaran ah inagoo cidna niyada ku hayn inaynu xeerkan samayno, markaas ayeynu soo saari karnaa xeer kuwada dhanyihiin xuquuqda shirkadaha kale gadisan ee dalkan ka shaqaysta ee cashuur biyayaasha ah.

   Aniga dhaliilo faro badan ayaa iiga muuqda xeerkan marka kowaad, input-kii ama figradii xeerka loo sameeyey oo loo qabto workshop ee caadada inoo ahaan jirtay oo dadka loo yeedho oo participate-ka fikirkooda la waydiiyo taasina way ka maqantahay xeerka. ***Qodobka 2aad*** halka waxaan ku hayaa laba go'aan oo mid gudidu soo saartay lifaaqa hortii, iyo go'aan gudidu soo saartay oo shalayto laynoo qaybiyey, labada go'aan ka danbe laguma darin oo gebi ahaan laguma darin weliba ***Qodobka 80aad iyo 81aad*** laba qodob oo ka mida xeerkan waa laga saaray oo ahaa xeerkan waxaa lala fasirayaa dastuurka dalka.

   Qodobo qayrul dastuuri ah ayaa ku jira xeerka, markaana waxaa waajib saaran gudida ahaa in laga saaro waxyaabahaa qayrul dastuuriga ah, markaa go'aankan ay inoo soo gudbiyeen shalayto waxaa ku jira qodobo qayrul dastuuriya oo uu ka hadlay lifaaqii hore, qodobka kowaad ee xeerka ayaa ka mida.

   ***Qodobka 1aad farqadiisa 4aad*** waxay ka hor-imaynaysaa dastuurka ***Qodobka 53aad*** siduu lifaaqii ay xukuumadu soo dirtay sheegay. Xeerku waxaa uu dhaqangal noqdaa marka golahuna ansixiyo madaxwaynuhuna saxeexo, ma jiro xeer inta toban sano ka hor lagu dhaqmay la yidhaahdo maanta ha dhaqangalo suuragalna ma noqonayso.

   Markaa waa in laba mid uun la yeelaa oo ay ka timaadaa golaha: ama waa in heshiisyada la sheegayo golaha la horkeeno oo aynu ansixinaa inta ka horaysa ee xeerkan aan la ansixin ama waa in dastuurka lagu qoraa wixii aan dastuurka ka hor imanayn labadaa qodob uunbaa inoo banaan waxkale inooma banana.

   Waxaa kaloo ku darayaa xeerkan eray bixinta Xil.c/qaadir si fiican buu uga hadlay xeerkan waa la soo turjumay terminology-ga xeerku wuxuu leeyahay waxaa fasiraya wasiirka , waxaa fasiraya agaasimaha guud waxaa fasilaya komishanka, waxaan odhan lahaa eray bixinta waa in kelmed walba lagu qoraa kelmed ingiriisi ah oo micnaynaysa si uu macnaheedu u noqdo mid standand oo aan laga sugin wasiir iyo agaasime guud.

   Waxaan kaloo u gudbayaa ***Qodobka 2aad,farqada 4aad, 5aad, 7aad,iyo*** 10***aad*** intuba waxay ka hadlayaan ruqsad, ruqsadaasi waa inaynu midayno qaabka loo qaadanayo weliba khilaafbaa ku jira mar waxaa bixinaya Agaasime guud marna wasiirkaa bixinaya marna komishankaa bixinaya, si dhab ah waa in xeerkan loogu qoro cida bixinaysa, shakiga ku jira aynu ka saarno.

   Waxaa kaloo ***Qodobka 2aad farqadiisa 11aad, 13aad iyo 19aad*** ay ka hadlayaan dhamaantood liisanka ruqsad la soo bixida, qodobadaas oo dhan ee ruqsada ka hadlaya waa inaynu midaynaa.

***Qodobka 2aad farqadiisa 18aad*** oo qeexitaanada ah iyo waa in la kale xadeeyaa awaada komishanka iyo wasaarada waayo sida awooda komishanku u qoran yahay waa komishan wasaaradeed.

Markaa waxaynu u baahanay in la qeexo wasaarada howsheeda oo ay noqoto body siyaasada wasaarada uun ku shaqaynaya, C/qaadirba sheegay komishanku noqdo mid qaran oo madax banaan oo debeda ka ah interesna ku lahayn shirkadaha iyo wasaaradu.

***Qodobka 2aad farqadiisa 20aad,*** 28aad waxay isku qaldaysaa liisan qof la siinayo iyo liisan shirkad la siinayo,qof liisan lasiinayo iyo shirkada liisanka la siinayo maxay kale yihiin waa inay kale saaraan oo ay ahaadaan waxkale qeexan oo cad.

***Qodobka 11aad*** wuxuu odhanayaa fasiraada xeerka waxaa iska leh wasaarada, anigu waxaan leeyahay dee adeer wasaaradi xeerma fasirayso, waxaa fasiraada xeerka iska leh maxkamada dastuuriga ah oo cidkale shaqo kuma laha .

***Curubka 2aad, Qodobka 1aad*** siyaasad xeerkan hagaysaaba, bilaa siyaasad ayaa xeerkan lagu sameeyey, xeerna marka la samaynayo siyaasad baa lagu hagaa, xeerku siyaayad ma hago. Waa la dejiyaa siyaasadii xeerkan oo golaha wasiirada la geeyo oo laga ansixiyo hadii kale saldhigimaayo, markaa waxaan odhan lahaa xeerka dejintiisa siyaasada ha ka harayso

***Qodobka 3aad farqada 14aad*** maxaa looga jeedaa mabaadiida ee uu qorayo xeerku, anigu waan fahmi waayey ee idinka sheegi doona, ***Qodobka 3aad farqada 9aad*** wuxuu noqonayaa doorka wasaaradu, wasaaradu waa political body iyadaa dowlada uga masuula shirarka caalamiga ee shirkadi ugama wakiil noqonkarto, anigu waxaan leeyahay qodobku wuxuu sax ku yahay siday xukuumadu ku soo gudbisay, oo ah “ *wasaaradu waa cida wakiilka u ah dawlada iyo cidii ay u wakiilato ayaa ku matalaysa shirarka caalamiga ah Heer Gobol ah ama Heer caalamiye”* oo cidaasi waa aanay ahayn cid interest ku leh oo ka mid shirkadaha. Sidaana ha loo raaco oo Goluhu ha ka dhigo.

Waxaan kaloo iyaduna aan ka saari lahaa meesha, **Farqadaha 18aad,19aad, 20aad iyo Faqrada 21aad** oo intuba ka hadlaya wax gaara oo gudiddu inoo keentay, waana qayru dastuuri, waayo? Isgaadhsiintu waxay ka kooban tahay boqol nooc oo internet baa ku jira, mobilekii baa ku jira, landlinekii baa ku jira, micro-waves, oo afartan qodobna mid gaara baa laga hadlayaa oo Cablekii baa ku jira, markaa sabab gaar loogu soo qaado anigu ma garanayo hadii kuwii kale aan laga hadlayn.

Sida ku cad ***Qodobka 4aad farqada 6aa ee “B”*** xubnaha komishanka saddex oo ka mida ayaa asaaradu soo xulaysaa. Waa Qodobadaan hore uga hadlay bay ku jirtaa. ***Qodobka 5aad faqrada 8aad*** oo ka hadlaya isku xidhka, wasaaradu malaha awooda isku xidhka, komishanka yeelanaya, oo heshiiska ay shirkaduhu ku gaadhaan ayaa dhaqan gal noqonayee wasaaradu waxay ku dibada kaga keenaysaa ma jirtaa, waxay ku heshiiyaan baa dhaqan gal noqonaya bay ugu dhaxaynaysaa ( arbiter body) u noqonaysaa ama komishanku u noqonayaa.

***Qodobka 7aad faqrada 7aad xarafka “I”*** Agaasimaha Guud iyo komishanka awoodo siman oo isku soo noqnoqonaya bay noqonayaan, markaa waa in awoodaha meesha laga saaraa. ***Qodobka 19aad*** waa Ruqsadaha, qodobkani makala xadidayo maalgashiyada wadaniga ah iyo kan shisheeyaha, markaa waa inuu kala cadeeyaa labadaa nooc ee maalgashiga ah. ***Qodobka 21aad farqada 1aad*** habka kala wareejinta ruqsadaha, waa in xeerkani cadaynayaa marka ruqsadaha

laka wareejinayo waa inuu xeerku cadaynayaa, habka lagu bixinayo ruqsadahana waa inuu xeerku cadaynayaa.

***Qodobka 22**[aad]* marka liisan ama ruqsad la bixinayo mudada la haysanayo xeerkay ku taala waa 380 maalmood sanadkii waxbaa dheer, markaa waa in 10 cisho ama 5 cisho wax ka badan warbixintu aanay qaadan, lama arag ruqsada intaa qaadata. ***Qodobka 30**[aad]* ogolaanshaha qalabka isgaadhsiinta, waxaa lagama maarmaan ah intaan la bixin ruqsada in qalabka uu qofkaasi keenayo marka hore la cadeeyo qaabkuu nonoqnayo, hadii qofkii oo keenay la yidhaahdo markaas ayaa la eegaya qofkii wuu khasaarayaa,

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Xeerkan waxaa ka maqan qabytii Boosaha, qaybtii Ciqaabaha iyo waxyaabo badan oo technical ah markaa waxaan odhan lahaa, xeerku waa qabyo, Halkaa aan ku hakino oo heshiiyadii hore loo galay ha la keeno, oo ha loo dhiibo dad farsamo ahaan wax soo hagaajiya, waxna ku soo kordhiya.

3. **Md. Maxamuud Dhunkaale Guutaale(Xisbiga UDUB):-** Qodobka ugu horeeya aan ku bilaabayaa anigu waxa weeye wasaarada boosta isgaadhsiinta ayaa fulinta iyo kormeerka hawlaha isgaadhsiinta, waxa xaga danbe lagaga daray Qodobka waxa ay u wakiilan kartaa hawlaheeda shaqo cidkale, qodobkaa anigu waxaan leeyahay hawl wasaarada boosta iyo isgaadhsiinta ama wasaarad kale ay leedahay cid kale looma wareejin karo sida dastuurku dhigayo fulinteed, dhamaan hay'adaha dawladah ee wadanka ka jiraana waxay leeyihiin awood, awoodoodaana cid kale lama wareegi karto, qodobkan ay ku tilmaantay inay cidkale wasaaradu u igmanayso shaqadeediina waa in wax laga badalaa.

Qodobka kale aan ka hadlayaa waa Komishanka isgaadhsiinta magacaabistiisa, anigu waxaan leeyahay komishan kan isgaadhsiinta ha noqdo ama mid kale eh, waxaa magaacaabistiisa iska leh madaxweynaha, qodobkaasina wuu ka soo horjeedaa dasrtuurka oo cid kale oo xaq u leh oo magacaabi kartaa ma jirto, qodobka kale aan ka hadlayaa isna waxa weeye, xaqa dacwadaha iyo ka garniqista isgaadhsiinta waxaa la siiyay kaana komishanka isgaadhsiinta kaasi wuu ka soo horjeedaa dastuurka iyo dharciyada u yaala wadanka ka garniqida iyo xaqa dacwadah waxaa iska leh waaxda garsoorka.

Ruqsada isgaadhsiinta ama lisama waxaa bixinaya baa ku taal xeerkan komishanka isgaadhsiinta, waxaana angiu kaana u arkaa inuu ka soo horjeedo sharciga wasaarada bay u igmatay dawladu bixinta lisimada iyo ruqsadaha kaana waxaan u arkaa inuu ka soo horjeedo sharciyada wadanka, waxaan kaloo aan xeerkan ku arkay sidii uu sheegay c/qaadir, shirkadkasta oo intaan xeerku dhaqan galin hore loo siisay lisamo wuxuu noqonayaa dhaqan gal, haduu ka soo horjeedo shuruucda dalka ma sidaasaa lagu ogolaanayaa? Taasina waa maya, wuxuu la m id noqonayaa shirkadaha ama ninka kale ee la siiyay lisamada waana inayna dib u loogu jadiidiyaa haduu ka soo horjeedo xeerka lisankii hore.

Waxaan kaloo halkan ku hayaa, hadii hantida ma guurtada xadhkaha laymanku waxaa lagala tashanayaa cida leh, haday ku heshiin waayaan waxaa go'aan ka gaadhaya komishanka, hanta qaran maaha, waa hanta qof gaar u leeyahay, taasi waxaan u arkaa inay sharciga ka soo horjeedo, dhamaan 80 qodob ee xeerkani ka kooban yahay markaan akhriyay midkasta wax sharciga ka hor imanayaa ku jira.

**Waxaaan soo jeedinayaa**.

- In xukuumadu xeerarka ay inoo soo gudbinayso ay la taliye sharci soo marisaa.
- In xeerkan dib loo celiyo oo sharciga la soo waafajiyaa, lana siiyaa wakhti badan.

4. **Md. Aadan Muhumed Hoori(xisbiga UDUB):-** angiu waxaa leeyahay sharciga xeerkan ku jiraa si wanaagsan oo caaqiibo leh bay gudidu uga soo shaqaysay oo hawlo badan oo wakhti inagaga lumi lahaa bay inaga furatay, waa inaynu u mahad naqnaa, runtii wax la naqdiyo kumaan arag, qaar baa lahaa dhamaan qodobadiisu way khariban yihiin may inoo akhriyaan, haday wax ku arkeen, waxaan leeyahay gudoomiye xeerkaa wax weyna baa umaha ugu jira, oo dhaqaale badan baa dalka ugu jira, hadaynu wixii dalka dantiisa ahba muran galino, waxa laga yaabaa wax bishan inaga dhamaan lahaa hadaynu dib u dhigno inay wax badan baajino wadaniyadna maaha, hawsahn noocan ahna ciduun baa qaban lahayd cidii labada madaxweyne u garteen maxaynu ugu diidaynaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Aynu xeerka food (cod) galino oo dhankii loo bato ha noqoto, in la ansixiyo waan ayidayaa.

5. **Md. Maxamed Saalax Cige(Xisbiga UDUB):-** dhamaan xeerku qaabkii xeerarku u qornaan jireen uma qorna qodobadiisana waxaa ka muuqda inuu hadal uun yahay oo aan waxba diidayn waxna wajibinayan, waxaana xeerka ka kow ah inuu xeerku dhadhan xeer yeesho, sidaa darted marka ugu horaysa waxaan leehayahay waxaa lagama maarmaan ah inuu siduu o qoran yahay qaabkii xeer u qornaan jiray, oo qaad xeer loo dhigaa.

Qodobka kale aan is dultaagayaa waxa weeye Qodobka komishanka ka hadlaya, magaca xeerkuna waxaa ku qoran isgaadhsiinta, markaa dee ha la yidhaahdo xeerka komishanka iyo isgaadhsiinta la yidhaahdo sid dastuurka ku cad, sidoo kale siyaasadii guud ee wasaarada ayaa iyana xeerka ku dhex jirta, oo ay ahayd inay xeer hoosaad noqoro ama mar danbe la keeno.

Sidoo xeeru wuxuu tilmaamayaa heshiiyo, kuwaas oo ku saabsan isgaadhsiinta heshiiyadiina form malaha hadii la odhan lahaa heshiiyada noocaas ah baa loo raacayaa lamana tilmaamin, wax tafaasiil ah oo iyada xeerku ka bixinaya ma jirto, markaa waa in heshiiskii la keeno ama heshiiski xeer lagu soo sameeyo, oo goloyaasha sharci dejinta loo soo gudbiyaa, taasina waa arrin muuhiima oo ubaahan in laga fiirsado, hadii kale dhaawici karta xeerka laftiisa, waxaad dareemaysaa marka la samaynayo ama dadka sababaha loo saanayo ruqsadaha inaanu xeerku si cad u kala qeexayn, iyo sida loo maamulilahaa falalka ciqaabeed ee xeerka ka dhashana iyana kama muuqato, intaas waxaan u soo arkay wax yaabah xeerka looga baahnaa inuu siduu cad u kala tilmaamo.

Hadaan qodobada xeerka intaan ka gaadhi karo ka tilmaamo, Cutubka 1[aad] qodobo guud baa la tilmaamay hal qobob iyo farqadiihiisiina way ku jiraan, markaa hadii qodobo guud la tilmaamay waa inay magacii xeerka soo gashaa oo lagu tilmaama, tan labaadna waxa weeye farqada labaad dib habayn u baahan waxay ka hadlaysaa xuduuda ama xadka xeerku gaadhayo, iyana faqrad ahaan baa loo tilmaamay laakiin qodob ahaan bay xeerka u gali lahayd, faqrada 3aad waa ujeedadii xeerka in kastoo wasaarada la siinayo aad moodaa, hadana wuxuu dhadhamaay inuu xeerka u jeedadiisii ka hadlayso, markaa faqrad ma noqonayee wuxuu noqonaya in isaga laftiisa

la sii qayb qaybiyo, oo qaybo loo kala saaro oo waliba wax lagu kurodhiyo ayaan run ahaantii meesha ku jirta, waxaana fiican in qodob gaara laga dhigo.

**Faqrada 4aad**, hadaad akhrido waxa kuu soo baxaya dhawr arimood, marka hore waa statement caadi ah oo xeerku tilmaamayo, xaga hoosena wuxuu ku tilmaamayaa inuu xeerku komishanku aqoonsanayo heshiiyadii hore loo galay, markaa komishan ma aqoonsado, xukuumada ama barlamaan baa aqoonsada, markaa iyana nuxur ahaan bay iska hor imanaysaa, inkastoo la tilmaamay in wuxuu aqoonsanayaa tahay waxaan dastuurka ka hor imanayn, **Faqrada 5aad** iyo **7aad** hadii la isla akhriyo iyana iska hor imaad baa ka muuqda, iyana waxay u baahan tahay in ama la isu keeno ama waxyaalah qaarkood laga saaro, tusaale waxaa ku qoran waxaa ku haboon dhamaan shuruucda ku haboon iyo xeerarka hada jiraa waxay shaqayn doonaan ilaa inta xeerku dhaqan gal noqon doono, taasina mabaadiida ayay ka hor imanaysaa.

Waxaa taa ka sii darn **faqrada 7aad** ee isla qodobkaa, iyaduna si ka duwan sida qodobadaa hore tilmaamayaan, intuba waxay ka simanyihiin waa nooca statement oo waxay abuurayaan iyo waxay ka hadlayaanba oo maamulayaanba ma jrto, **Qodobka 1aad**, waa qodobkii horeyn lahaa, ee tilmaamaha guud isaguna raaci lahaa, markaa farsamo ahaan in la si waydaariyo, sidoo kaleba eray bixinta halkan ku qorani waxaa laga soo dheegtay in afafkale, ama bixin qaab kale loo soo dheegtay oo muran hadhaw abuuri kara, halka ugu danbaysana wxaa lagu qoran inay fasiraad wasaaradu leedahay, hadaan tusaale ka soo qaato faqrada ugu horeysa waxaa ku qoran **Suurta Galin** markaad sii arkhrido waxaa ku qoran waxaanan **Suurta Galin** ahayn bay tilmaamaysaa, erayo kale oo caynkaas oo kale ah ayaa ku jira.

Suurta gal maaha in Xeerkan gudihiisa in Xeerkii komishank, komishankii iyo kii isgaadhsiintu ku wada jiraan, aad bay taasina u adkaanaysaa in xeerkan lagu wada ansixiyo, farqadaan hore u soo tilmaamay iyo faqrada 9aad habgashiga ayaa iyana ku qoran oo la micna ah faqrada hore ee suurtgalinta ah, sidoo kale wuxuu tilmaamaysaa laba Agaasime, intas ayaan wakhtiga daraadeed kaga gudbayaa taas.arrin meesha qabanay maaha in xeer dhan oo golayaashii soo ansixiyeen in la isku qabsado erayadii meesha ku jiray.

Fasiraad xeerka qaabka erayadiisa loo fasirayaa in wasaaradu leedahya iyana meesha kuma jirto, Qodobka 3aad oo ku saabsan shaqada wasaarada iyana waa policygii wasaarada ayaa meesha ku xusan oo ilaa 20 waraaqood ah, waa siday xeerka u dhaqan galin lahayd, ee maaha siyaasadii wasaarada, waayo waxaa xeerka ku taal, in shaqadii isgaadhsinta iyo hawsheeda loo igmaday Komishanka, markaa rolekeedu wuu yaraanayaa wasaaradu hadana policygeedii baa ku jira, komishanka inaan xeerkan lagu darin ayaa meesha ku jirta, waxaana cad in komishanku hoos imanayo wasaarada, sidaa darted cutubka 4aad iyo qodobada hoosyimaadaba aniug meesh waan ka saari lahaa.

Waxaa fiican in komishanku uu madax banaanaado, wuxuu xeerku tilmaamayaa in komishanka toos ay wasaaradu u maammulayo oo xataa shaqaalaha komishanka inay wasaaradu siday doonto u maamulayso, **Qodobkiisa 1aad** bal eeg way iska hor imanaysaa iyo **Qodobka 11aad** ee agaasinka, dhamaan qodobadaasi waxay kuu cadaynayaan in mushkilada ay abuurayaan oo conflict of interest ku jiro, **Qodobka 21aad** ee nuxunrka xogta faqradiisa 3aad waxaa ku jira shuruudo kale oo qodobkale ay tilmaamayeen.

**Anigu intaas baan k gaadhay waxaan soo jeedinayaa:-**

- In xeerku si uu xeer taabagal ah u noqdo inuu dhadhan xeer uu yeesho ayaan soo jeedinayaa,
- Waxyaabaha ku saabsan awoodaha iyo heshiiyada in xeerku kala saarona waan soo jeedinayaa

6. **Md. Cali Maxamed Aadan(xisbiga Kulmiye): -** Horta ugu horeyn waxa badan oo hawla ayaa ka soo gaadhay samaynta xeerkan xukuumadu muday waday inagu dhawrjeer oo lifaaqyo laga daba keenay baynu celinay, hawlshii gabagabayntii baa inaga inoo taal, angiu waxaan ka soo horjeedaa xildhibaanada leh xeerkan aan celino ma waafaqsani, xeerka wixii laga badalayo ee lagu darayo iyo hagaajintiisa inagaa awoodeena weeye awooda horta ha inga qaadina, mida labaad Marka xeer la samaynayo dastuur baa lagu saleeyaa, waxaan dastuurka waa faqsanayn in la inoo keeno maahayn, horta dastuurka ma waafaqsana inaga daaya badbay inala galysaaye, hadaanay dastuurka waafaqsanayn, muxuu madaxweynuhu inoogu keenay maxay gudiddu uga oo talo bixisay hadalka yaynaan ciyaar u odhan.

Xeerkan wuu waa faqsanayahay dastuurka, inagana isku habayntiisu xil ina saran tahay, maaha inaynu statement jeedino eh, waan inaan Qodobka hadalnaa, Qodob qodob baan u galyaa xeerka, mabaadiida guud ee xeerku **Qodobka 1aad** bay ku cadahay, hagaajintiisa xeerka faqradiisa 1aad waxaan ka saari lahaa 2010 ilayn xeerka wakhti laguma xadeeyo, awoodaana inagaa lehe aan ka saarno, xeerkan waxaa lagu dhaqayaa oo lagu maamulidoona dhamaan qaybaha isgaadhsiinta ee soohdinta Somaliland marka laga reebo isgaadhsiinta ay istimaalaan xoogag difaaca dalka iyo dhaamaan cutubyada ciidama, horta dhaman isgaadhsiintu way ku jirtaa xeerka oo **Qodobkaa 1aad** baa cadaynaya, dhadhanka xeerkana iyo hagaajintiisa Gudidda dhaqaalaha soo jeedinteeda iyo lifaaqa madaxaweynaha xeerku waa xeer dhamaystiran, wuxuu tilmaamayaa inuu dhaqaalaha qayb ka qaadanayo.

Heshiiyadu maaha heshiiyo caalami, waa heshiiyo muwaadintii iyo xukuumadu ay wada galeen oo local, maaha qayr aynu ka doodayno oo caalami ah, Ruqsadah ay xukuumadu bixiyo iyo heshiiyada ay muwaadiniintu ku heshiiyaan goormaan la ina horkeeni jiray, oo aynu ansixin jirnay, Gudidda Komishanka horta aynu kala saarno soo jeedin iyo magacaabis, imisaa komishan la soo jeediyay, kan doorashadaa ka mid, cidbaa soo xusha, madaxweynahaa magacaaba, inagaana ansixina, waxaan anigu waa faqsanahay qaabkii Gudiddu u soo jeedisay oo sharciga waafaqsan.

Arrinta ruqsadaha, sida xeer loo sameeyo dastuurkaa inoo cadeeyay, xeerka ayaa wax lagu faahfaahiyaa, xeerkuna wuu cadeeya cida ruqsada bixinaysa, waxaynu wax ka dhex abuurno maaha, way dhamaystirayaa, waxaa lagaadhay dhadhanka iyo wixii ka dhiman gudidda dhaqaalaha ayaa kabtay, oo in si fiican la isula akhriyo iyaga iyo xeerka ayaa haboon.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerka dalkaa u baahan oo umadaa u baahan inaynu cunaha isaga duubno maaha xeerka mudaynu haysanay, in sida gudiddah dhaqaaluhu u soo jeediyay ku ansixino ayaan qaabaa oo aynaan jidgooyo noqon baan qabaa.

7. **Md. Maxamed Faarax Qabile (xisbiga UCID):-** xeerku wuxu u eegyahay xeer saldhig uu ka duul aan lahayn, taasina waxay meel ka dhac ku tahay **Qodobka 128^aad^** ee dastuurka qaranka, kaas oo dhigaya sidan soo socota " dastuurka waxaa saldhiga mabaadiida islaamka", **Faqrada 2^aad^** "Xeerarka waxaa saldhiga u ah dastuurka, wixii ka hor imanayaana waa waxba kama jiraan," qodobka waa lama dhaafaan, xeerkan aan lahayn saldhig dastuuri ah, dastuurka sharci ka sareeya ma jiraan.

   Waxaan kaloo is dultaagayaa, **Qodobka 11^aad^**, oo aan qabo inuu qodobka isgaadhsiintan loo qaadan karo oo dastuurka ugu dhow inuu yahay, qodobkaasi, wuxuu dhigayaa dhaqaalaha dalka, " si loo xaqiijo kobcinta wax soosaarka, kor qaadida heerka nolosha, abuurida hawlo shaqo iyoguud ahaan horimarinta dhaqaalaha dalka, dawladu waxay dejinaysaa siyaasad guud oo balaadhan oo ku salaysan mabaadiida suuqa xorta ah, hantida gaar ahaaneed, hantida wadareed, hantida qaranka iyo maalgashiga shisheeyaha" " iyadoo la dhawrayo inaanu habka dhaqaale noqon mid horseeda dabaqadu kooban, ama ku ururta koox ama dad tiro yar, si aanay u abuurmin dabaqado ka kooban qaar wax haysta iyo qaar aan waxba haysan si aanay u balaadhan faraqa dhaqaale"

   Tan kale waa maal-galinta shisheeyaha ee dalka gudihiisa, dawladaa damaanad qaadaysa xeerbaana nidaaminaya, marka xaga dhaqaalaha la eego wa qodobkan, lamana qaadan karo iyadoo loo samayn xeer ka turjumaya sidii mudanayaashii iga horeeyay halkan ka soo jeediyeen, waxaa la rabaa inuu ka dhasho qodobkan dastuuriga ah, **Qodobka 12^aad^** wuxuu sheegayaa khayraadka dabiiciga oo ay soo galayso bada iyo bariga, habka loo isticmaalayaa dawladaa damaanad qaadaysaa haseyeeshee waxay ku maamulaysaa xeer mug leh oo ka turjumaya oo tafsiir mug leh.

   **Qodobka 53^aad^**, heshiiska kasta oo xukumadu gasho oo keenaya culays maaliyadeed oo ka baxsan ama u baahan in loo abuur xeer ma ansaxayo ilaa Golaha wakiiladu ansixiyaan" heshiiskata oo hore ugashay xukuumadu, oo marka karteeriyadii wax lagu saaray iyo xeerkii oo faahfaahsan, wixii la eego ka hor qalin degdegay oo xukuumadu iska gashay sumad loo soo qaadan maayo, waxaa wixii golaha wakiiladu ku murmeen, ina cigaal baa bari laga ogolaaday, ina cigaal bari buu madaxweyne ahaa aniguna golaha maan ahayn, xilka maanta inagaa u joogna, maanta suga aan sharci ku fadhiyin daliil u qaadan maayo eh, xukuumadu waa inay keentaa heshiiyadii ay gashay, waa in loo eego waxtar inay u leedahay umada, waa in loo eego xeerka loo samaynayo isgaadhsiinta inuu yahay mid mabaadiida guud ee u madan iyo sinaanta muwaadiniinta iyo xaqooda mid ilaalinaysa, inagaana la inoo wakiishay, waana qodob kama kacaan.

   **Waxaan leeyahay oo aan soo jeedinayaa:-**

   - Mar hadaanu xeerkani saldhig laga duulo oo dastuuri ah aanu lahayn, Xeerkaa waxaa loo baahan yahay in tignishankiisii iyo hawshiisii dib loogu noqdo, hadii xeerkaa sidaa ku sii dayno inuu yahay kii Golahani ku dhiman lahaa.

**Ajendaha:- Waxaa sii socday Doodii Xeerka Isgaadhsiinta.**

**Guddoomiyaha Fadhiga:-** C/raxmaan Maxamed C/Laahir Ciro Ayaa furay fadhigan, waxaana maalintii labaad sii socotay doodii xeerka isgaadhsiinta, Gudoomiyuhu wuxuu ku soo dhaweeyay mudanihii ugu horeeyay.

8. **Md. Maxamed Cali Xirsi (xisbiga Kulmiye):-** Gudoomiye dhamaantiin waad mahadsan tihiin mudane iyo marwooyinba, run ahaan xeerkan ma soo wada akhrin lakiin waxaan rabaa in aan wax ka idhaahdo cutubyada aan soo akhriyay, lakiin waxaan ogsoonahay in xeerkani golaha horyaalay laba kal-fadhiba ajandahana uu inoogu jiray xeerkana waxaa hubaal ah in uu aad ugu mihiimsan yahay dalka iyo qarankaba, waana xeer dhaqaale dalka u soo kordhinaya waxaa kala oo aan ogahay in misaaniyada qaranka ku jiraan **38 bilyan** oo Shillin Somaliland ah oo u dhigma (8 Milyan oo doolar) wasiirka maaliyaduna waxaa uu naga codsaday in xeerkani ka mid yahay xeererka uu wasiirku naga codsaday in si deg-deg ah wax looga qabto.

Mudanayaal hadaan xeerkan la ansixin **38 Bilyan** ee dollar ma helayno taas macneheedu ma aha in xeerkan aan iska dedejino, lakiin waxaa haboon in aan xeerkan aan waajibkeena ka gudano, xeerkan waxaa noo keenay dawlada sidaa darteed golaha waxaa mihiim u ah in shaqadiisa uu ka qabsado, xeerkana aad u akhriyo wax ku daro waxna ku kordhiyo,

Mudanayaal marka golaha xeer yimaado waxaa noogu xilsaaran guddi, sidaas darteed waxaa haboon in gudidaa golaha soo horfadhiistaan, si mudanayaasha u qanciyaan su'aalaha ay tabayaan, hadaba hadaan u soo noqdo xeerkan waa xeer u baahan in laga baaraandago qodxahana looga saaro, hadaan u soo noqdo xeerka qodabadiisa cutubka ko'waad (ujeedooyinka xeerka) anigu qodobkaa sidiisa ayaan u dayn lahaa.

Cutubka labaad (wasaarad iyo shaqadeeda) hadaba wasaarad shaqadeeda waan naqaanaa ee anigu ma qabo in lagu qoro xeerkan

Cutubka sadexaad oo ka hadlaya Komishanka Isgaadhsiinta anigu waxaan qabaa in cutubkan sadexaad yahay cutubkan ugu mihiimsan ee xeerka, waayo waxa uu ka hadlayaa hay'adii maamulaysay isgaadhsiinta ka hanaqaaday dalkeena, wax yaalo badan ayaa u baahan in aynu eegno waxaa ka midda:- Heshiisyada, Ruqsadaha Liisamada, Xaquuqda Macaamissha Oo U Baahan In La Ilaaliyo.

Hadaba anigu waxaan qabaa in **Cutubka 3aad, Cutubka 4aad, Cutubka 5aad** laga dhigo cutub kaliya waayo waxaa ay ka wada hadlayaan Komishanka oo kaliya dhamaantood markaas taasi waxaan soo jeedin lahaa hadaba waxaan jecelahay qodobadaas Komishanka ka hadlaya in la helo. Waxaan doonaynaa in aan ka helo shaqada iyo waajibaadka sida komishanka loo abuurayo, waxaan doonayaa shaqada ay qabanayaan in aan ka helo xeerka, waxaan doonayaa in aan ka helo sidda loo magacaabayo Komishanka, waxaan doonayaa inta sanadood ay shaqaynayaan iwm.

Waxaa kaloo muhiim ah in xeerku ka hadalo sida xafiiska loo buuxinayo hadii mid dhinto mushaharooyinka ay qaadanayaan.

Intaas dabadeed waxaan rabaa in la cadeeyo magaca u qoran Komishanka Somaliland hala yidhaahdo **Kommission Qaranka Somaliland,** halkan xeerka waxaa ku qoran “In wasiirka Boosaha iyo isgaadh siinta ayaa maamulaya” ,hadaba hadii taasi u dhacdo in dhibaato galayso.

Arinta kale Komishanka iyo Wasaaradu way is daba socdaan markaas waa in la kala reebo, hadaba anigu waxaan qabaa hadii uu komishanku madax banaan yahay xeerka halagu cadeeyo. qodobka labaad sidiisaan ku qaadanayaa oo odhanayay ( Kommission isgaadhsiinta way u madax banaan yihiin habsami u socodsiinta shaqadooda) markaas qodobkaasi wuxuu siiyay Komishanka madax banaani.

**Qodobka 3aad** isaga waan is ka dhaafi lahaa inuu isticmaalo awoodaha, A,B,C waan ka saari lahaa qodobka afraad waxa uu sheegayaa awoodaha Komishanka **Q. 5aad**, oo ah xarunta komishan waa caasimada hargeysa, hadaba shardi maha in xarunta hargiesa oo qudha laga furo mana aha in xeerka lagu cadeeyo xeerka in la yidhaahdo Hargiesa Fadhiyayaan.

---

**Q.6aad** Waajibaadka komishanka aniga sidiisa ayaan u dayn lahaa cidii wax ku daraysana wax ku daraysana ha ku darto,

**Hadaba anigu waxaan soo jeedin lahaa:-**

- in xeerka ayn sii dayno, laakiin waa in komishanka isgaadhsiinta la madax baneeyo oo sadex agaasimaa ku jira, isla markaasna waa in wasaarada iyo komishanka la kale reebaa.

**Gudoomiyaha:-** waxaan idiin sheegayaa, in Xeerkii Gobolada iyo Degmada wax ka badalkiisii xukuumada aan ku celinay. Fadhiga xidhan buuna maanta fadhigu inoogu dhamaanayaa markay doodu dhamaato.

9. **Md: Siciid Cilmi Rooble (xisbiga Kulmiye):-** Xeerkan waxa soo gudbiyey madaxwaynaha, markaas halkeenan uun Dastuurka laguma ilaaliyee xikuumada dhan oo distoorka inay tixgeliso ah ayaa soo gudbisay xeerkan oo wasiiro leh. Horta xeerkan waxa soo curiyay haddaba raga halkan ka yidhi 80 Qodoba kuma jiraan Dastuurka Dawladda Xaal ha Siiyaan.

Mudanayaal xeerkan waxyaalo badan ayuu dhowrayaa hadaba xeerkan miisaaniyada wax badan ayuu u danaynaynayaa halkan miisaaniyada waxaa ku jirta **38 bilyan** oo miisaaniyada ugu jirto, miisaaniyada marka taas la bilaabayey jeeniwari ayaa laga bilaabayey imikana april ayaa la marinayaa durtaba Afartaas bilood ee xeerku noqnoqnayey way ku wax-la-dahay waxaan meesha ku jirta mushaharkii shaqaalaha tii ciidanka sidaa daraadeed musharka la kordhiyeyna bal saami uga fiirsada.

Xeerka waxaa uu damaanad qaadayaa muwaadin uu Somaliland iyo maalgashadayaal waayo waxaa ka soo shaqeeyey dowlada dhan, xeerkani waxaa kale oo ilaalinayaa dadwaynaha isticmaalay isgaadhsiinta cashuurtan waa ilaalinayaa.

Hadaba hadaan ka hadlo xaqa farsamad xeerka way jiraan waxyaalo naga dhiman oo inagoo gacanta ayuun baan taagnaaye khubarada xeerka samaynayaa ayaa naga dhiman, waayo inagoo seeskii ayaanu dhigaynaaye niman dhamaystiraya from A to Z ma nihin, Mudanayaal ruqsada xukuumadaa bixisay heshiisyadana xukuumada ayaa xaq u leh, hadaba shaqo xukuumada leedahay iyo heshiis madaxwayne la galay muwaadiniinta reer somaliand yaan carqalad la gelin,

Aniga waxaan odhan lahaa sharkadeheenii isgaadhsiinta ayaa dhismay xeerkiina waan ka daba gaynaynaa yaan fandhicil aan ku jirin laga dhex raadin, Gudidii dhaqaalaha waan u mahadnaqayaa mudo badan umaynaan dhiibin, horta xilkii wasaarada waxa wada qaatay komishanka in wasaaradiina xilkeeda qabsato, komishanka xilkiisu guddoomiye mar hadii goluhu xidhmayo

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waa In Xeerkan La Ansixiyo oo la sii daayo iyadoo taladii Gudida la raacayo. Waad mahadsantihiin.

**10. Md. Muuse Maxamed Ismaacil ( Xisbiga UDUB):-** Anigu waxaan leeyahay waa xeer mudo badan golaheena dhaxyaalay kuna xidhan tahay arin dhaqaale waa in Xeerkan Aan Ansixino, waxaana kaloo ku xidhan arin maamul sidii loo maamulo lahaa isgaadhsiinta Somaliland xeerkan waxaa soo curisa hadii uu xeer maamul yahay cida ku shaqaynaysa hadaba anigu waxaan odhan lahaa wixii xeerka lagu kordhinayaa halagu daro, Halka komishanka iyo wasaarada waxaad moodaa in xilkeliya ay wada qabanayaan halkaa halaga fursado,

Waxaa jira isgaadhsiin badan oo hawl badan qabta iyo qaar hawl yar qabta, markaas muwaadiniintana waa in dowladu ilaalisaa hantidooda, waxaa kaloo jirta bahalaha la yidhaahdo anteenooyinka oo meelwalba ka taagan dhibaato badan oo caafimaadna keena in la iiro gaara loo yeesho.

**Waxaan soo jeedinayaa:-** Xeerkan in Aan Ansixino, ayaan soo jeedinayaa anigu.

**11. Md Maxamed Barkhad Miigane (Xisbiga UDUB):-** Anigu waxaan qabaa in isgaadhsiinta baahi weyn aynu qabno in loo helo xeer xakameeya waliba xeerkani in badan ayuu golaha yaalay Waxaana mudanayaal aynu ognahay in cashuur weyni inagaga baaqatay, sidaa daraadeed dawlada waxa ay cashuurta ugu weyn ka helaann isgaadhsiinta, Mudanayaal 18 Sano walaal waxaa naga lumey dakhli badan, waxaana haboon in xeerkan degdeg loo dhaqan geliyo.

Anigu shakhsi ahaan waan amanayaa xeerkan sida fiican ee looga soo shaqeeyey dawlada iyo guddida, ta kale waxaan amaanayaa shirkadaha bareyfadka ah sida fiican ee ay hormarka keeneen isgaadhsiinta, in kastoo ay jirto cashuuro ku baadey. Walaalalayaal xeerku waa wax nool oo la kobciyo markaas wixii xeerka ka dhiman aan ku daro, Komishanka iyo Wasaaraduna Ma Kala Maarmayaan

**Waxaan Soo Jeedinayaa:-**

- Wadanka 18 Sano waa ka lumey Cashuuro Badan ee Xeerkan Deg-deg ha loo ansixiyo
- Xeerkan ha la ansixiyo iyada oo lagu darayo lana eegayo talo bixintii Guddida Dhaqaalaha

**12. Md. Axmed Ducaale Bulaale ( xisbiga Kulmiye):-** meelaha aan eegay waxaa ka mid ah, arrinta komishanka oo aad looga hadlay, markaad eegto siday isgu yaacsantahay komishankii, xukuumada lafteedii iyo wasaaradiiba, arrintaasi waxay u baahantahay in komishanka si wanaagsan loo qeexo, komishanku haduu yahay komishanka qaranka waa in dhismihiisu maraa lineka madaxweynaha haduu ka duwan yahayna waa heerkuu yahay maraa.

Intaa marka laga yimaado, waxaa kaloo xeerka ku jira, oo gudidda dhaqaaluhu aad ugu celceliyeen, heshiiyo lagalay, oo xeerka lagu sheegay, **Qodobka 53aad farqadiisa 3aad** markuu heshiis dawliya ka hadlayo, inaguna ma ansixino heshiin aan dawli ahayn, wuxuu leeyahay "Golaha Wakiiladu wuxuu anisxinaya heshiiyada dawliga ha ee ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale. Nabadgalyo iyo kuwa keenaya culays maaliyadeed ee aan ku soo ururin miisaaniyada ama keeni Kara wax ka badalid arrin qaanuuni ah" marka markaan heshiis ka hadlayno kaas uun buu ka hadyahay.

Waxaa halkan ku jira oo qodob dasruuriya ah la yidhaahdo maalgashiga, dastuurku wuxuu leeyahay maalinta shisheeye ee dalka gudihiisa ah dawladaa damaanad qaadaysa, xeerbaana nidaaminaya, sidoo kale waxaa ku jiray igmasho, oo heshiiyada caalamiga ah shirkad baa loo igmanayaa, anigu waxaan qabaa taana wa in meesha laga saaraa, oo shirarka caalamiga ah waa in dawladu matashaa, oo wasaarada iyadaa loo igamanayaa oo madaxweynuhu u igmanayaa waa mid qaran oo caadi, laakiin in iyadu cid u sii igmataa waa khalad.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Markaynu samaynayno waa inaan la akhrino dastuurka iyo inuu waa faqanyahay, doodeenu yaanay noqon miyaynu ansixnaa iyo miynu celinaa, ee waa inaan xeerka sax oo wixii aynu tabanayno ee sharciya ee Ina dhaqaysa oo aan lagu salayn marxalad mar jirta.

13. **Md. Dr. Cali Yuusuf:-** Gudoomiye marka ugu horeysa waxaan jeclaa magaciisu inuu noqdo xeerka isgaadhsiinta Somaliland, halka xeerka 2010 laga dhigayna xeer lambar baa galaya iyo wakhtiguu soobaxay, isgaadhsiinta Somaliland marxalado badan bay soo martay, waxaan xasuustaa telephonkii ugu horeeyay wuxuu ku xidhnaa markab bada ayaala, oo daqiiqadii $13 anigaa k dirsaday, maanta nus dollar baa lagu hadlayaa dibada.

    Xeerkani faa'iido weyn buu dalka u leeyahay, oo waxaa ka mida telefoonada in la isku xidho shirkadaha iminka jira, inagoo caasimadaha ku nool oo dhawr telefoon sita oo aan wada hadalayn, in la isku xidho markaa aad bay muhiim u tahay, dawlada cashuurteedii ayaa ku jirta marka meel laga maamulo dee inta saacadood ee shirkad walba hadasho ayaa cashuurta lagu soo dalici doonaa, hadii aan soo qaado, Qodobka 1aad farqadah1aad ilaa 6aad, waxaan ku dari lahaa marka madaxweynuhu saxiixo ayuu dhaqan galayaa, waxaaa ku taal marka golayaashu anixiyaan oo kaliya.

    Q1aad faq 6aad waxay sheegaysaa qodobkasta oo khilaafsan waa waxba kama jiraan, halkaasi waxay inoo cadaynayaa shirkadihii hore ee jiray in marka madaxweynuhu saxiixo inay xeekana ku wada dhaqmaan. Faqrada 8aad, waxay leedahay iyadoo la dhiirigaliyo habka isgaadhsiinta casriga ah, lana tixgalinayo shuruudaha isgaadhsiinta ee caalamiga ah, waxaa xil kaasaaran yaahy mud 3 sano ah, waxaan ku badalay "18 bilood" inay ku soo dhamaystirto shuruudaha xeerhoosaadka komishanka, 3sanadood gudohoodna komishanka gaadhsiiso isku filnaansho, markaa mudadu waa inay kala horayso, oo isgaadhsiina casriga ah ku samaysaa sanad iyo badh, isku filnaanshahana lagu gaadho saddex sano.

    Eray-bixinta way fara badan tahay, markaa axaan soo jeedinayaa eray bixintaa in loo qoro si alfbeetikal order ah, oo ay u kala horeeyaan kolkaas ayay fududaanaysaa sida loola soo baxayo, Qodobka 4aad faqrada 6aad, waxay ka hadlaysaa Komishanka, siday u qoran tahay waxbaan ka badalayaa, waa inu ka koobnaado daneeyayaasha oo dhan shirkadaha, wasaarada iyo aqoon yahano madaxbanaan, oo si ay isu dheeli tirmaan waxaan qabaa shirkaduhu inay 3 xubnood

yeeshaann, Wasaarduna 3 qof ka yimaadaan oo wasiirku magacaabo iyo 3 qof oo aqoonyahano ah oo isugu jira xeeldheerayaal xaga isgaadhsiinta ah iyo garyaqaano.

Qodoka 7aad waxaa ku taala komishanku inuu wax qaadan karo ama loo hibayn karo, Hibayntaasi aniga ilama qurux badna komishanku inuu meel kale wax ka qaato aan dawlada ahayn, hadii wax la hibaynayo waa in qaranka la siiyo, hadii iyaga wax la siiyo waxay noqonaysaa laaluush, Sidoo kale Qodobka 14aad faqrada 1aad waxaa ku taala kaalmada komishanka, kaalmadaasi waa inay noqotaa qalab oo ayna noqon cash, in cash la siiiyo waxay ila tahay in taasi aanay meesha ku jirin, oo laga reebo.

Arrinka laynaha telefoonada ee wadooyinka dul sudhan, hadii ay go’aan oo gaadhi jiidho dadka ka goynaya, in xeerka lagu daro, oo laymadaas dhulka hoosteeda la mariyo, taasayna faa’idadu ku jirtaa oo way raagayaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkani mudo dheer buu ina horyaalay, xildhibaanadu marakay ka gutaan waajibaadkooda ina la ansixyo ayaan qabaa, waad mahadsantihiin.

## Ajendaha: - Waxaa sii socday Doodii Xeerka Isgaadhsiinta.

**Guddoomiyaha fadhiga:-** C/caziiz Maxamed Samaale Ayaa furay fadhigan, waxaana maalintii Saddexaad sii socotay dooda Xeerka Isgaadhsiinta, Gudoomiyuhu wuxuu ku soo dhaweeyay mudanihii ugu horeeyay.

14. **Md. Ibraahim jaamac cali (xisbiga Kumiye):-** xeerkani waa xeer aad ugu mihiima dhaqaalaheena, lana odhankaro waa sectorka ugu mihiimsan sectarada dhaqaalaha ku soo biiray kaalinweyna kaga jira dhaqalaha dalka, sababta xeerku u yimi waa sababtaa, hase ahaatee xeerkani wuxuu keeni karaa inuu sectrokaa baa bi'iyo ama kor u qaado, waxaa la inooga fadhigaa sharci aan sacterkaa hore umaray aynu ku dhisno oo ku xoojino, sharci international standerd ah oo u dhigma sharciyada aan isgaadhsiinta kula tartamayno, iyo minimum stranderdka caalamiga ah.

Xeerkan nasiib daradiisu waxa weeye shirkado hana qaaday oo ku hana qaaday meel aan xeer ka jirin ayaa xeerkoodii maanta wadnaa oo samaynaa, dadkuna ama shirkaduhu danahooda dhaqaale ay qayb ka yihiin xeerarku saamayn weyn buu ku yeeshaa oo waxay isku dayaan inay si iyaga u dana u qaloociyaan, waa wax dhaca oo meel walba ka dhaca.

Ilaah hada xeerar badan buu goleheenu ansixiyay, dad badan oo commercial interest ku leh, inay raadinayaa xeerkan iyo siduu noqonayo, danayntuna waa caadi oo dadbuu dantoodii ka hadlayaa, anigu waxaan qabaa arrintani danayn way dhaaftay, xeerkan ganacsatu si toosa ayay faraha ula soo gashay, golahani xeerkaa waxa aan ka yeelno ayay sumcadeenu ku xidhan tahay.

Tala bixinta gudidda dhaqaalah anigu kalsooni kuma qabo, Waxay ila tahay inay Gudiga Dhaqaaluhu candadowleen xeerkan ama dibeda ha kaga timaado faro gelin ama kartidaro ha ka ahaato, tala bixinta waan hayaa, xeerkani halkanuu inoogu yimi isagoo lifaaq la socdo, lifaaqaaso oo qodobada qaar amentmentgaraynaya, waad ogaydeen oo waa tii goluhu wuu isla gartay in dib loo celiyo oo xeerka dib la isugusoo guro, gudiduna lifaaqa marka horeba way hayeen, wayna diideen inay ku daraan lifaaqa xeerka.

***Gudoomiyaha Point of order****: - halkan xeer baa laga hadlayaa gudi laga hadli maayo xeerka uun ku koobnow mudane,*

Anigu waxaan qabaa waxaas oo dhan markaan isu geeyo, Waxaan Golaha iyo Shirgudoonkaba u soo jeedinayaa in cod loo qaado oo lifaaqaas gudidu dhaqaalaha oo la meel lays ka dhigo,, Markaan xeerka eego waxaa ii muuqanaya, xeerarkii kiiniya iyo Uganda ayan halkan ku hayaa, xeerarka isgaadhsiintu waa xeerar farsamo, xeer wax ka duwan xeerarka ee isgaadhsiinta inaanu keenu noqon karay, waa xeer isgaadhsiineed, oo inuu Somalia ku yaal, ama Kenya ku yaal iyo inuu halkan ku yaal waa isku mid, xeerkeenu inuu ku waa la mid noqdo oo ugu yaraan waxay ka hadlayaan uu ka hadlo waxaan qabaa inay laga maarmaan tahay.

Intaa markaa dhaafo waxaan u galayaa xeerka, Xeerarka waxaa loo eegaa dhowr nooc sida:-

a. Luuqada xeerku waa inay luuqad clearah uu ku qoran yahay oo ninba dhankuu doono aanu turjumi Karin taasna xeerkan malaha, marka ugu horaysa xeerka ina la dhaqan galiyo wa luuqada uu ku qoran yahay

b. Waa inuu leeyahay xeerku is haysi (co-orrence) is haysi oo midiba mida kale ku xidhan yahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In xeerkan la macaaneeyo ayuu u baahan yahay, yeynaan ansixintiisa ku degdegin ee aynu ka shaqayno cadaawe daba ina eryi maayo Gudi madax banana ha loo saaro oo ka baxsan Gudidii dhaqaalaha, ka dib markaa aan Baas garayno.
- Komishanka wuxuu u candadowlan yahay siduu xeerku u candadowlanyahay, meeshii la dhigo komishan kaba waxaa daba yaala wasaarada boosaha iyo isgaadhsiinta, komishanka waxay ahayd in shaqo madax banaan lo sameeyo.

15. **Md. Maxamed jaamac cabdi (Xisbiga Kulmiye):** Anigu waxaan is dultaagayaa shan Qodob, Ugu horayn, soo jeedinta gudidda waxaan u soo jeediynayaa mahad balaadhan way shaqeeyeen, laakiin waxay sameeyeen wax aan caado ahaan jiray, Qodobkasta oo ay wax kabadal ku sameeyeen way sababyeen, Mudanayaashii halkan dooda ka soo jeedinayayna may dhaliilin mayna durin qodobaday kaabeen, lamana odhan dastuurkay ka hor imanaysaa, waxay taabteen Qodobkasta oo kaabeen.

Miisaaniaydii aan halkan ka ansixinay, waxaa la sheegay in xeerkan wax weyn kaga xidhan yihiin, waa arrin muhiimad weyn lahayd habka ay u soo jeediyeen waxa Matalan tacriifadahaas oo kale ay qiimeeyaan waxay qaadi karaan, iyadoo la raacayo dastuurka golahana la horkeeno, waxay la eegeen dastuurka, adeegyada la qaadayo iyo habka loo qaadayo, waxay la eegeen xeerarka maaliyada, wayna waa faqeen.

**C/qaadir jirde Point of order**:- markaan ka hadlaynay xeerka waanu sheegnay Qodobada sharciga ee aanu waafasanayn, C/Raxmaan Osman Caalina wuu sheegay Qodobada dasruurka ee aanu waafaqsanayn,

Komishanku marka la eego xeerka way u madax banana yihiin hawlahood, dhaqaaleheedah iyo shaqadeed, waxayna wada shaqayn la leeyihiin oo line minister la yihiin wasaarada boosaha iyo isgaadhsinta, oo ku maamusha isgaadhsiinta iyo siday xukuumada ula shaqayn lahaayee, waxaan qabaa in isbadel kooban lagu sameeyo xubnaha, halkan mudanihii iga horeeyay wuu sheegay, sadex xubnood baa wasaarada isgaadhsiinta ka tirsan, markaa waxaan soo jeedinayaa sadeexdaa markaa laga reebo Agaasimaha Guud in wax laga badalo, midna shirkadaha la siiyo, shirkadaha isgaadhsiinta, xubina si madax banana loo soo xulaa.

Markaa sidaa layeelo, waxaa yaraanaysa ku xidhnaanta ay xukuumada ku xidhan yihiin, haday Gudida dhaqaaluhu soo jeediyeena waan la qabaa, habka magacaabista, waxaan qabaa inuu soo jeediyo Wasiirku Madaxweynuhuna magacaabo, waxaan soo jeedinayaa inta lagu daro soo jeedinta madaxweynaha iyo magacaabista in sidaa lagu ansixiyo.

Qodobka 30[aad] ee dastuurka ayaa isna isdultaagayaa oo qodobka xeerkani salka ku hayo ah, oo ah ilaalinta xoriyada isgaadhsiinta ee muwaadiniinta ama qof kastoo istimaalaya, qofkastaa xor buu u yahay isticmaalka isgaadhsiinta, qof isaga baadhitaan lagu hayo mooye, qodobka 57[aad] ee xeerkan ee tilmaamaya sirta iyo xoga aad buu u kooban yahay, waxaan jeclaan lahaa intaas oo qaab xeera intaan soo gudbiyo hadal qoraalka lagu daro.

Wakaaladaha oo ku xusan **Qodobka 3aad faqrada 9aad,** xubintiisa sagaalaad, Marka kowaad wakaalada waa la bixin karaa, xeerna waa lagu bixnin karaa, si madax banana waa loo bixin karaa, sababaynteedana halkanaan ka soo jeedinayaa, xukuumadu waxay leedahay qaanuun, qofka qaanuuniga ah wuxuu leeyahay waxa natural percent ku leeyahay marka reebo axwaalu shakhsiga meherka, guurka iyo isdhaxalka oo kale, qofna wuu wakiilan karaa, heshiiyada iyo ruqsadah laga hadlay, ee ku xusan Qodobka 80 faqradiisa 2aad, iyo farqada 20aad ee Qodobka 3aad, ee Gudidu soo jeediyeen, rag badana naqdiyay, waxaan leeyahay naqdiga halkan laga soo jeediyay mid daliil sharci ah waafaqsan maaha.

Heshiisyada aynu ansixinayno waa kan ku xusan dastuurka ee Qodobka 53aad, ku maamulka maaha, sidaa darted waa faqsanaanta dastuurka waxaa dastuurku ku bixiyay ilaalinteeda madaxweynaha hadaad eegto **Qodobka 90aad** waxaan qabaa xeerkan baahida loo qabo darted, akhriyada hordhaca qodobkaa iyo faqradiisa 1aad

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Markaanu eegno muhiimada xeerkan iyo baahida loo qabo, Waxaan qabaa in si degdega loo ansixiyo.

16. **Md. c/qaadir jaamac xaamud( xisiga UDUB):-** Waxaan aamin sanahay in uu dastuurka waafaqsanyahay, waxaan odhan lahaaa komishanka madaxwaynuhu ha soo magacaabo goluhuna ha ansixiyo,.waxaan qabaa in xeerkan gudidu ka soo shaqaysay, wuxuuna xambaarsanyahay waxyaabo badan sida isku xidhka shirkadaha, faa'iidada kale ee uu leeyahay waxaa ka mida xaalad adag baan ku jirnaa, hadii dalkeena wax u soo kordhaan maaha inaan is hortaagno, markaa in si wanaagsan oo aan cunfi lahayn aan uga shaqayno ayaan aaminsanahay, waxaan aaminsanahay inuu dastuurka waafaqsanyahay.

    Hadaan galo xeerka, hal mid uun baan isdul taagayaa oo ah komishanka, anigu waxaan qabaa waxaa ka soo shaqaynaha oo soo magacaabaya madaxweynaha inagu waa inaan ansixinaa, waxaan qabaa Agaasimaha Wasaaradu inuu ahaado Gudoomiyaha Komishankaa si ay isula jaan qaadaan, shuruudaha lagu soo xulayo waa inaanu danbi galin, waa inuu muwaadin yahay waxaan ka dhigi lahaa **B.T , J** xarfahaa, waxaan ku kordhin lahaa inaanu ka waynayn 35 jir.

    **Waxaan soo jeedinayaa:-** Waxaan qabaa in xeerkan wixii mihiima ee mudanayaasha ku darayaan la lagu daro oo si degdega loo ansixiyo

17. **Md. Ahmed Barkhad Obsiiye( xisbigha UDUB):-** waxaan is waydiinaynaa, xeerkan ma loo baahanyaha mise looma baahna? Xeerka baahi baa loo soo sameeyay, , waan ognahay in miisaaniyada 38 bilyan kaga xidhan tahay, Waan taageerayaa xeerkan in lagu sameeyo ama lagu daro isku xidhka shirkadaha ah waxaan isdul taagayaa komishanka, waxaan aad ugu mahad celinayaa Gudidii ka soo shaqaysay xeerkan, gudidu wixii loo igmaday way soo qabteen oo qodob qodob bay xeerkan isu dultaageen.

    **Waxaan soo jeedinayaa:-**

    - siday Gudidu usoo gudbisayna la raaco oo xeerkana loo ansixiyo

18. **Md. Ibraahim caraale cabdi ( xisbiga UDUB):-** xeerkan **xukuumadau soo gudbisay, gudida dhaqalaahana u gudbinay, Gudidu way camcamiyeen xeerka** Xeerkan wuxuu xadidayaa

ama kootaynayaa wixii xorta ah kana dhigayaa koota, shacabka dani ma ugu jirtaa suuqa shirkada kaliya maamusho, qodobka 10aad waa laga saaray tartankii xorta ahaa oo waxaa laga dhigay mid xadidan, Q4aad faqrada 9aad shirkad baa la yidhi oo shirkado waa laga saaray, Qodobka 5aad, waxaa lagu daray ( bada iyo baria waxaa loo wakiilanayaa cid) xeerkan wax badan baa ka maqan, wuxuna u baahan yahay akhris danbe.

**Waxaan soo jeeidnayaa:-**

- Waa in la dhamaystiro xeerkan
- Waa in loo saaro Adhoc committee gudida dhaqaaluhu aanay ku jirin
- In xeerka dib loo akhriyo loogana shaqeeyo
- In komishanku madaxwaynuhu magacaabo Goluhuna Ansixiy

**19. Md. Ibraahim Axmed Heybe( xisbiga Kulmiye):-** Gudidda dhaqaaluhu waa mahad-san yihiin hawshan fiican ee ay soo qabteen waanan ku amaanaynaa sida fiican ee ay hawsha u soo galeen. Xeerkan dib haloo dhigo ma qabo ee waa in xeerkan la ansixiya waayo waa xeer ay dowlada kasoo shaqaysay gudideeduna si wanaagsan uga shaqeeyeen odoroska miisaaniyada waxaa ku jira **38 bilyan** oo hadii xeerkan aan la ansixin aynaan heleyn hadaba anigu waxaan rabaa xeerkan hadii ay jiraan qodobo la duray ha la cadeeyo.

**Hadaba anigu waxaan soo gudbin lahaa:-**

- Goluhu xeerkan isgaadhsiinta oo lagu daray talo bixintii gudida **Ha Lagu Ansixiyo**;
- Xeerkan oo baahi wayn uu wadanku u qabo Ha La Dedejiyo;
- Xeerkan oo baahi wayn wadanka u qabo sidaas darteed ha loo dedejiyo.

**20. Md. Maxamed Xuseen X. Ciise( xisbiga Kulmiye):-** Xeerkan guud ahaan waa fiican yahay, xeerkanina xeerarka golaha iman jiray kama duwana, laakiin habka loo soo qoray ayaa qabyo ah, waana xeer maalin lagu sixi karo, Boosahana waa laga saari karaa xeer ama loo samayn karaa awoodaha Wasaarada, aniga waxaan odhan lahaaa awoodaha iyo waajibaadka ha la kala saaro,awoodaha anigu waxaan saari karaa wasaarada hadaba isku xidhka shirkada waa mudnaanta koowaad ee xeerka .

**Hadaba aniga, waxaan soo jeedin lahaa xeerkan**:-

- Ha la Ansixiyo Oo Lifaaqa Guddida ha lagu saxo.

**21. Md. Bashiir Tukaale**:- anigu ma qabo in xeerkani yahay mid dastuurka ka hor imanaya, xeerkani waa mid muwaadiniinta dhiirigalinaya, oo dhaqaalaha kobcinaya, waxani waa wax ka awood badan tartan cidii awoodeeda leh ayaa loo dhiibayaa baan qabaa.

**Waxaan anigu odhan lahaa:-**

- Xeerkan sidaa aan ku ansixino, oo yaynaan la habsaamin,

22. **Md. Axmed Maxamed Kijaandhe:-** markaan eegay xeerkan waxaan arkay inaanu anfacayn, halkan waxaan ku hayaa xeeran sida kii sirilaanka iyo qaarkale oo isgaadhsiinta ah, waxyaabaha aan ku arkay, waxaa ka mida sida " xeerku waa inuu ilaaliyo danaha maalgashiyayaasha" halkan waxaan u fadhinaa ilaalinta danta dadkii ina soo doortay mise shirkadaynu u danaynaa? Waa maya.

Xeerku sidoo kale wxuu leeyahay xeerarkale ayuu madaxweynuhu soo saarayaa, taasi maanay khalad ahayn, ma madaxweynaa xeer soo saari kara, aniga intaa ugu horaysa ayaa xeerkan igaga filan, xeerkani wuxuu madax isugalinayaa, komishanka iyo Wasaarada boosaha iyo isgaadhsiinta, wuxuu leeyahay Komishanku wuu madax banaanyahay, hadana Wasaaradaa maamulaysa, markaa xeerarku inay cadaalad ahaadaan baa fiican, xeerkanina waa kii madaxa isugu keen xidhayay.

Waxaan leeyahay, Qoboka isgaadhsiinta iyo ruqsaha hadaan soo qaato, Cutubka 6aad, Qodobka 11aad, ilaa lix bayj baa ka hadlaya, cida bixinaysaana kuma qorna, anigu halkan waxaan u fadhiyaa ilaalinta danta umada, xeerarka aan halkan ku qoran ee ka soo horjeeda danta iyo mabaadiida dalka, ma ogalaan doono inuu golahan ka baxo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkanai wuxu u baahan yahay in dib loogu noqdo, waana taageersanahay,, in gudi loo saaro Adhoc committee ah oo aanay Gudidda dhaqaaluhu ku jirin, oo dib loogu noqodo.

23. **Md. Ibraahim Mahdi buubaa:-** Nuxurka xeerkan ragii hore ku waafaqsanahay anigu, waxaan jecelahay in si guud looga hadlay, waxaa la inooga baahan yahay cadaalad iyo sinaan inaan ku dhaqno, inagaa kow ka ah iftiiminta wixii khaldan, waxaan taageersanahay in gudi loo saaro xeerkan oo dib loogu noqdo, sida ibraahim Caraale oo si wanaagsan uga hadlay oo faahfaahiyay .

Waxaynu ognahay halkaynu marayno maanta, iyo halka ay shirkadaha isgaadhsiintu marayaan iyo adeegyada ay qabtaan mana fiicna, in wax wax yeelaya aan soosaarno, khasab ina shirkadaha la isugu xidhaa ma dhacayso, waxaan idiin sheegayaa in hore loo tijaabiyay heshiiska shirkaduhu iyagaa leh oo ku heshiinaya siday isugu xidhmi lahaayeen, dawladuna hirgalinteeda ayay leedahay, xeerkani waa xeer muhiima u mihiima dhaqaalah, internetka aynu isticmaalno jabuuti baa laga keena, dhibna kuma jirto. Shirkadaha ruqsaha la siiyayna waa lo bahan yahay, waana in la heno shirkado kale oo la tartama.
Waxaad moodaa in heshiiska shirkadii iyo xeerkii inta la isku soo lifaaqay uu xeerkii noqday, wxuu xeerku sheegayaa in shirkad loo igmaday shirarkii caalamiga ahaa, cida loo igmaday waa Wasaarada Boosahah isgaadhsiinta oo uu qaranku u igmaday, waxaan ku soo ururinayaa Somaliland waxay halkaa ku gaadhay waa tartanka xorta ah, ha la hirgaliyo in xeerku dhiirigalinayo tartanka xorta ah, oo lifaaqii madaxweynaha ha lagu soo daro,.

**Point of Correction:-** Gudoomiyaha ayaa sheegay in lifaaqii madaxweynaha lagu soo daray xeerka.
**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Lifaaqa gudidda dhaqaalaha isna waa in daaqada laga tuuraa, waxaab waa faqsanahay in xeerka gudi loo saaro, oo ha laga soo fiirsado, oo yaan la dedajin.

**Kal- fadhigii 14aad fadhigii 34aad 07/04/2011**

**Gudoomiyaha fadhiga:- C/caziiz Maxamed Samaale.**
**Quraankii lagu furay waxaa akhriyay; - Ibraahim Caraale**

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal waxaa inoo sii socon doonta doodii, waxaan ku soo dhoweeynayaa mudnayaasha hadhsanaa ee dooda ka qaybqaadanaya, wuxuuna ku soo dhoweeyay:-

**24. Md. Axmed yasiin Sh. Ali Ayanle:-** Shirgudoonka iyo mudanaaysha waan idin salaamayaa, maanta wadama aduunka waxa ugu horeeya ee dakhliga cashuuraha ka soo gala waa isgaadhsiinta, waxa labeeyaa waa shidaalka haday soo saaraan, hadii beero leeyahay waxaa labeeyaa isgaadhsiinta, haduu macdan leeyahay waxa labeeyaa waa isgaadhsiinta.

Dawladu sadex meelood ayay dakhligeeda ka heshaa, bada, bariga ama hawada oo isgaadhsiinta ah, hadaba aniga waxaan qabaa xeerkani inuu wadanka muhiim u yahay, waxaan qabaa in xeerkani wadanka muhiim u yahay, waana xeer in badan loo baahnaa, mudanayaal, isgaadhsiineetnu waa tan ugu badan caalamka, wadanka waxay usoo kordhiyeen sumcad fiican, hadaba makaanu samayno xeer isgaadhsiineed maaaha inaan xeer dalka shar u keenaya samayno.

**Piont of order Xil rayte: -** Wixii aan xeerka ku salaysnayn maaha in laga hadllo

Xeerku waa inuu ilaaliyaa xuquuqda muwaadinka isagoo xeerka aan ka hor imanayn dastuurka, dastuurkeena waxaa ka buuxa xeer baa qeexi doona, xeerkan waxaa ka soo shaqeeyay Gudidda dhaqaalaha ee Golaha, markaa anigu ma qabo inuu xeerkani khaladaad badan ku jiraan, wixii eror ah aan saxno, waayo anigu shakhsi ahaan waxaan qabaa in xeerka afsomaliga uu ku qoran yahayna aad u fiicanyahay, hadaba waa inaan wixii khaladaad ee ku jira aan saxno.

Waxaan u galayaa xeerka qodobo ka mida oo xasaasi ah:- heshiisyadii hore ee xukuumadu gasho waa dhaqan dawladnimadu waa dhaxal democracy wuu ogol yahay waana lays dhaxlaa dawladnimadu waa system is dhaxla, Xukuumada cusub waxay dhaxlaysaa heshiisyo cida uu qabanayaa waa golaha dawladnimadu waa tix galin wixii ka horeeyaya

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Intaan xeerkan wixii khaladaad ee ku jira ka saxno, oo aynu ku daro lifaaqii gudidda dhaqalaha oo ku ansixino.

**25. Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** Waxaynu ka hadlaynaa xeerka isgaadhsiinta:- anigu waxaan qabaa umadan xeerka masuul baynu uga nahaye aynu ku dadaalno wixii illaahay inagu og yahay ee aynu isleenahay waxbaynu ku hagaajinaynaa waar ninyahaw umadan hala jiheeyo.

Xeerkan isgaadhsiinta wax badan ayaa ku jira 8da bayj ee hore waa qodobo guud eray bixin inta kale wax la yidhi komishan ayaa la yidhaahddaa wasaaradda ayaynu ognahay komishanka meeshaba halaga saaro waxa kale oo aan leeyahay guddida dhaqaaluhu xeerkan ayay mid ka dhinac sameysay, Guddida dhaqaaluhu xeerkan ay soo sameeyeen sharka halaga saaro oo aynu khayrka aynu qaadano. Intiisa wanaagsan waan taageerayaa xeerkan guddidu soo samaysay waa in uu ahaadaa oo laga fiirsaddaa xukuumadu yaynaan keenin wax yacyacoodda.

Waxaan soo jeedin lahaa labadan xukumada iyo kan golaha waxaan soo jeedinayaa in laysku gurro. inaynu wexeena aayar isku hagaajisano komishanka dib u dhigano bari kana saarno wuxuu noqonayaa cilad ay naftu inagaga baxdo.

Xeerkan Waa general yaynaan ka dhigin cirka iyo dhulka ayaa lakala marayaa xeerkani xeerkiisii ha ahaa

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Kumanaan shirkoodd ayuu dalku qaadi karaa kuwo gaar ahna wuu qaadi karaa dalkani cid walba wuu ku filan yahay shirkaddii soo korodhana dadkeena ayaa shaqo ka helaysa.

26. **Md.Cabdikariin Aw Cali Shabeel:-** Shirguddooonka, mudanayaasha iyo martisharafta waad salaamantihiin, Marka aynu halkan ka hadlaynu arintu yaanay sheeko noqonin waa xeer waxaynu ka hadlaynaa xikmad inaynu uga hadalno, Amaan xildhibaanadii halkan ka hadlay intoodii badnayd si haboon u hadlay

Waxaan taageerayaa guddidii dhaqaalaha ee arintan soo jeediyay amaan ayaan u soo jeedinayaa waxaad moodaysay xildhibaanadii qaarkood iyadoo aynu ognahay xadiga dhaqaaleed ee uu ku fadhiyo sidii lacagta shirkadaha looga ururin lahaa anigu waxaan leeyahay yaan loo samaynin naanayso meelna loola cararin

Shirkaddaha wadanka maalgashanayaa waxay inooga mudan yihiin in la soo dhaweeyo shirkadahaa jiraana amaan ayay mudan yihiin

Hadii wax khaladaadi ku jiraan waynu ku khasbanahay in wixii khaladdada laga saaro, dhakhsana loo sii daayo, Komishanku inuu dhinacyada arintu khusayso waa inuu ka madax banaanaado. Heshiisyadii hore loo galay waa in sidoodii loo aqoonsaddo arintaana waa inaynu xukuuumadda ku taageerno. Waxaa si hufan uga shaandhayn karo khabiiro, Sida uu u qoran yahayna wax madmadaw ah oo ka muuqdaa ma jiro. Inaynu noqono gole isku fikira oo aanay arintu inaga noqon.arin marka laga hadlayo yaan ninba meel ula cararin.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waxaan soo jeedinayaa in mar hadii xildhibaanadii halkan ka hadlay in sidaa lagu sii daayo. Waxaan leeyahay sida ugu dhakhsaha badan in xeerkan loo sii daayo inagoo tix galinayna muhiimadda uu leeyahay

27. **Md. Cali Ibraahim Aareeye ( Xisbiga UDUB): -** Xeerka isgaadhsiintu mudo badan ayuu marna imanayay marna ka noqonayn, Waxaanan illaabeen markii uu wasiirka maaliyadii inoo sheegay in 38 billion uu ku fadhiyo taasaana muhiim

Xeerkan xukuumadda ayaa iinoo keentay guddida dhaqaalaha ayaynu u igmanay waanay soo huftay way soo hagaajiyeen marba hadii guddi loo igmaday

Xeerkan xukkuumada iyo Kan gudidi ismay diidin hadii daahir somcable siiyay siiraanyana wuu ku raacay,

**Waxaa dhaqaale iiga helaya dadkii aan waxba haysan deegaankayga ayaanu soo marayaa**

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan waxaan soo jeedinayaa Dhakhso haloosii daayo.

**28. Md, Abuubakar C/axmaan Good(Xisbiga Kulmiye):-** Waxaynu ognahay in xeerkan xukuumadu soo raacisay lifaaq Guddida Dhaqaaluhu way iska indho tirtay, Xukuumaddu way isku soo gurtay waanay soo gudbiyeen dood labaad ayay Golaha Wasiiraduu ka galeen in si fiican looga soo baaraan dago lagana soo saaro, Markii guddida dhaqaaluhu loo gudbiyay waxay ka tuurtay dhamaan Qodobadii, siyaasadda dhaqaale ee aynu qaadnay waa habka dhaqaalaha furfuran, makaa waa inaan markasta xasuusnaa.

**Qodobka 11** [aad] ee dastuurka ee laga saaray dhagaysta waa Qodobka suuqa xorta ah, wuxuu reebayaa inaan wax moniboly ahi jirin waxaa laga saaray abuuritaanka tartanka Xorta ah, Walaalayaal ma waxaynu ansixinaa suuqa madaw iyo wixii aan ka hor imanayn dastuurka oo laga saaray,

**Qodobka 6**[aad] ee waajibaadka sagxadii lagu tartamay ayaa laga saaray, Wasaaradu maaha in ay cid doorato, dhamaan waxaa laga saaray wixii dastuurka iyo shuruucda khusaysay, **Qodobka 9**[aad] waxaa halkaa laga saaray kalmadii shirkadaha, oo waxaa laga dhigay shirkad, jamacii waa laga badalay, waana Monopoly, ma monopoly baynu ansixinaa, tartanku waa furaha iyo calaaamadaha Horumarka xeerkan wuxuu ka hor imanayaa ganacsiga xorta ah, xeerkan waa mid ka hor imanay

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan in laga soo sameeyo akhris dambe lagana saaro Qodobada dastuurka ka hor imanaya. Komishanka waa in madaxweynuhu soo magacaabo Goluhu ansixiyaa.

**29. Md. C /casiis Maxamed Ducaale (Xisbiga UDUB):-** Waxaan anagu ku soo jiray dhawr iyo toban sanadood isgaadhsiinta oo aan ka shaqaynayayay, Xeerkan marka laga imaado isgaadhsiintu waa National Security issue, dhaqaalaha ayuu ka qayb qaadanayaa, ayaan darada ina haysataa waxa inaga horeeyay shirkadihii isgaadhsiinta, Waxaan doonayaa inaad fahamtaan inaguna aynu manta jaanis haysano maadaama uu nataional security yahay way dhaafsiisan ganacsi xidhxidhan.

Komishanka wuxuu noqonayaa kii waxaa Regulate garaynay wuxuu kala ilaalinayaa dawladii iyo shirkadihii, wuxuuna ilaalinaya danta shicibkii isticmaalayay ee custormerska ah iyo shirkadiihii, Markaa komishanku waa arint securtiga frequency waan in Golaha laga ansixiyaa, Komishanku waa inuu noqdaa mid madax banana, oo baarlamaanku ansixiyay, oo lala xisaabtamaa.

**30. Md. Xasan Cawaale Caynaan (xisbiga UDUB): -** Waxaan mahad u jeedinayaa Guddida Dhaqaalaha oo si fiican uga shaqeeyay, wakhti badana siiyay, waxa khalad ahna kumaan arag, Hal qodob ayaan wax ka badali lahaa **Qodobka 17**[aad] anigu waxaan odhan lahaa shirkadaha la ganaaxayo waa in digniin af ah la siiyo marka hore, marka labaadna mid qoraal ah la siiyo, ka dibna ganaax, Waxaan taageersanahay guddida dhaqaalahaa waa in lagu ansixiyaa lifaaqa gudidu ay sida fiican uga soo shaqeeyeen.

Sida kale xeerku wuu dhamays tiran yahay, ragan ka hadlayay mar qudha kama hadal qodob uu dastuurka ka hor imanayo, xeerkan ninka ka hor yimaad waa nin Somaliland ka hor yimid, Dawladu cid ayay u igman kartaa waayo dawlad yar oo daciif ah, waanay u igman kartaa waa in lagu taageeraa, Xeerkan wax kooto la yidhaa oo cid la siiyay ma jirto, Waan in qofka muwaadinka la siiyo fursad uu ku ganacsan karo, dalkeena isgaadhsiin casriya marka ayaa ka jirta, markaa xeer dhiiri galinaya.

**Gabgabadii waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan waa xeer dalka wax u taraya dadkuna u baahan yahay, waa in sidiisa lagu ansixiyaa sida guddida u soo gudbisay.

31. **Md. C/raxmaan Yusuf Cartan( Xisbiga Kulmiye) :-** Waynu isku raacsanahay in xeerka isgaadhsiinta la sameeyo oo loo baahan yahay, Xukuumaduu soo maray oo Ceeb maleh odhan wuu yeelan karaa, laakiin ingaa la inooga baahan yahay inaan hagaaajino, waan inaan saxno, xeerkan meelaha laga il duufay waa inuu policy yeesho iyo mabaadii, waana inuu sadex

    - Dadka shirkadaha waa inay free Competititve market helaan
    - Dadweynaha macaamiisah waa inuu ka jawaabayaa adeega saxana helaan
    - Qaranimadda Somaliland waa in bada dhulka iyo hawada in si fiican looga faaiidaysanayo.

Xeerkuna uu ka Dheegmaa Policyga , Xeerkan markaynu dajinayno waayo aragnimadii iyo khibradii 20 sanadood ee isgaadhsiinteena waa inuu ka turjumaa waa inay tahay standard xeerkan waa in loo dajiyaa waxa yaala ee jira, Amaanka isgaadhsiineed ayaa daciifa ----serviceka bixintiisa ayaa daciif ah, markaa dhibaatooyinka jira inuu xeerku ka jawaabo ayaa loo baahan yaha,

**Ugu dambayn waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan inaynu wanaajino ayaynu u baahanay, Xeerkani inaanu jiitamin oo inagu curyaamin wuxuu u baahan yahay Guddi farsamo oo waxa ka dhiman dib u eego, meelo badan xeerka waxa dhaawacaya afsoomaalig in turjumad saxa laga bixiyo, oo Xeerarkii laga soo turjumay halkan la keeno. Waad mahadsantihiin

| Cawad Cali Maxamed | c/risaaq siciid ayaanle |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ---------------------------------------------------------- | ------------------------------------------------ |